**Faafinta Warbaahinta** **Siidaynta degdega ah**

# HWDSB waxay lawadaagtaa Natiijooyinka Tirakoobka Koowaad ee Ardayga, Dhammaanteen waynu mudan nahay

Hamilton, Ontaariyo – Juun 20, 2022: Guddoonka Waxbarsahda ee Hamilton-Wentworth District School Board (HWDSB) ayaa soo saartay natiijooyinkii tirakoobka ugu horeeyey ee ardaydii, mashruuca mudnaanta leh kaas oo fure u ah horumarinta guddiga Equity Action Plan.

HWDSB waxay samaysay tirokoob xor ah ee ardeyda oo qarsoodi ah Maajo 2021. Dhammaanteen waxaynu tirinaynaa: Tirakoobka HWDSB ee Ardayda ee 2021 waxay waydiisay su'aalo ku saabsan aqoonsiga ardayga (jinsi, lab iyo dhedig, iwm.) si loo ogaado oo wax looga qabto caqabadaha nidaamka.

"Natiijooyinkan - oo ay weheliso tirakoobka shaqaalaha staff census ee 2019 iyo xisaabinta sinnaanta shaqada employment equity audit ee 2020 - waxay naga caawin doonaan fahamka bulshooyinkayaga si aan u samayno go'aamo caddayn ku salaysan si aan u taageerno sinnaanta, guusha ardayga iyo wanaagga," ayay tiri Sue Dunlop, Agaasimaha Ku-meel-gaarka ah ee Waxbarashada .

Heerka jawaabta ee guddoonka oo dhan wuxuu ahaa 48 boqolkiiba, iyadoo 24,177 arday ama qoysaskoodu ay soo gudbiyeen jawaabahooda.

Xeerka Ka-hortagga Cunsurinimada, Anti-Racism Act, 2017 ee 2017 iyo Qorshaha Waxqabadka Sinaanta Waxbarashada ee Ontaariyo Ontario's Education Equity Action Plan ayaa u baahan guddoonka dugsigu inay soo ururiyaan oo ay ka warbixiyaan xogtan.

HWDSB waxay u wajahday tirakoobka si dareen leh ka dib markay la tashatay ardayda, qoysaska, shaqaalaha, iyo xubnaha bulshada. Guddoonku wuxuu ku casuumay ardayda, qoysaska iyo xubnaha bulshada inay ka soo qaybgalaan fadhiyada macluumaadka tirakoobka ardayda waxayna u qabteen kulan xogeed la-hawlgalayaasha bulshada, si loo hago abuurista sahanka iyo in la hubiyo fahamka bulshada ee hindisahan.

Laga bilaabo 2022-23, HWDSB waxa ay bilaabi doontaa in ay tixgaliso siyaabaha loo isticmaalo xogta si ay u fahmaan hab dhismeedka ardayda HWDSB, iyo in ay soo saaraan warbixino ku saabsan guusha ardayga, fursadaha, iyo ka qaybgalka barnaamijyada.

Natiijooyinka la sii daayay maanta waxay muujinayaan in dugsiyada HWDSB ay yihiin meelo aad u kala duwan, halkaas oo ardaydu ay ku hadlaan 152 luqadood ee guriga, kasoo jeedaan dhaqamo badan oo adduunka ah oo ay isku aqoonsadaan jinsiga si ay u horumariyaan hababka aan rabno in aan ixtiraamno oo inaan tixgelino.

Tallaabooyinka xigaa waxay ku salaysnaan doonaan hababka ka-hortagga cunsuriyadda iyo cadaadis ka-hortagga, ee xogta is-dhexgalka, warbixinta iyo isticmaalka. Shaqaaluhu waxay hadda abuurayaan qorshe ay bulshada uga qayb-galinayaan qeexidda habkan iyo si loo hubiyo in xogta loo isticmaalo si taxadar leh, si looga faa'iidaysto ardayda waxna looga qabto sinnaan-la'aanta.

HWDSB waxay si guud uga warbixin doontaa natiijooyinka tirakoobka iyo sida xogtani u caawineyso hagidda barnaamijyada, xeeladaha, siyaasadaha, dhaqamada, agabka, iyo taageerada HWDSB.

Natiijooyinka qaar ka mid ah ee lagu muujiyey shaxda sawirka ee halkan ku lifaaqan waxaa ka mid ah:

**Jinsiga, Qoomiyadda iyo Diinta:**

- Ardaydu waxay isku sifeeyeen inay yihiin isir ka soo jeeda caddaan (62%), Koonfurta Aasiya (10%), Bariga Dhexe (10%), Madow (8%), iyo sidoo kale xulashooyin aan badnayn.
- Luuqadaha ugu horreeya ee ardaydu barteen waxay ahaayeen Ingiriisi (88%), Carabi (6%), Urdu (3%), Faransiis (2%), Punjabi (2%) iyo xulashooyin aan badnayn.
- Ardaydu waxay yiraahdeen diintooda ama xiriirkooda ruuxeed waa Masiixi (28%), Ma jiro xiriir diimeed ama mid ruuxi ah (21%), Muslim (21%), Cawaan (10%), iyo xulashooyin aan badnayn.

**Jinsiga iyo Galmada:**

- Ardayda loo aqoonsaday inay yihiin Wiil/Nin (48%), Gabar/Naag (47%), Aan Labada midna ahayn (2%), isweydiinaya (2%), Jinsiga milan (1%), iyo xulashooyin aan badnayn oo ay ku jiraan Midna ahayn, Labeebshe, Wiil u yaal, Wiil qarsoon, Gabar qarsoon iyo qaar kaloo badan.
- Markii la waydiiyay in ay yihiin labeebshe, 3% ardaydii jawaab-bixiyeyaashu waxay yiraahdeen Haa, 4% waxay yiraahdeen Ma Hubo, 94%-na waxay yiraahdeen Maya.
- Ardayda fasalada 5-12 ayaa wax laga waydiiyay noocooda galmo, waxayna sheegeen inay yihiin kuwa Haweysta jinsiga ka duwan/toos ah (68%), Weli isweydiinaya (13%), Labada jinsiba (8%), Aan sameyn galmo (5%), Pansexual (4%) iyo in ka yar xulashada.

**Dadka Naafada ah:**

- Jawaabaha, 11% ardaydu waxay sheegeen inay yihiin qof naafo ah.
- Noocyada naafanimada ee ugu badan waxay ahaayeen Feejignaan la'aanta Deficit Hyperactivity Disorder (5%), Feejignaan la'aanta Deficit Disorder (2%) iyo jawaabo kale. Naafada caafimaadka dhimirka (4%), Barashada (3%),

**Goobta dhalashada & Muwaadinnimada:**

HWDSB

We all count.
HWDSB Student Census 2022

- Markii la weydiiyay inay ku dhasheen Kanada, 84% ardaydu waxay yiraahdeen Haa, 15% waxay yiraahdeen Maya, iyo in ka yar 1% waxay yiraahdeen ma hubno.
- Markii la weydiiyay heerka muwaadinimo, ardaydu waxay sheegeen inay yihiin Muwaadiniin Kanadiyaan ah (87%), Soo-galooti Degey/Deeganaasha Rasmi ah leh (5%), Ma Hubo (5%), Asaliga (1%), Ardayda Caalamiga ah (1%) iyo xulashooyin aan badnayn. .

Fadlan wax badan ka baro attached infographic ku lifaaqan iyo mareegahayaga www.hwdsb.on.ca/weallcount,, halkaas oo aad ka heli doonto taariikh ay ku jiraan Su'aalaha Inta badan La Isweydiiyo (FAQs) ee ku saabsan tirakoobka.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan tirakoobka, fadlan la xiriir census@hwdsb.on.ca

- 30 -

**Xiriirka Warbaahinta:**
Shawn McKillop, APR
Maareeyaha, Isgaarsiinta iyo Ka-qaybgalka Bulshada
905.515.6227 | smckillo@hwdsb.on.ca